

### Waa maxay Silver Diamine Fluoride (SDF)?

SDF waa dareere lagu cadayi karo ilkaha si looga hortago bolalka ilkaha. Waxaa la mariyaa ilkaha iyadoon cirbad ama wax lagu daloolinaayo la adeegsaneyn, sidaas oowgeedna waxay waxtar u leedahay dadka reer Vermont ee dhibaataadu ka haysato helida daryeelka caafimaadka ilkaha. Daaweynta ka hortaga bolalka iyadoo la adeegsanaayo SDF waxay ka hortagi kartaa baahida loo qabi karo in si joogto ah hadba loo buuxiyo iliga bolalay mustaqbalka.

### Waa maxay habraaca la maro marka SDF la marinaayo ilkaha cunugaaga?

- Dhakhtarka nadiifinta ilkaha ayaa qalajin doonaa ilkaha cunugaaga.
- Wuxuu u marin doonaa SDF ilkaha bolalay iyadoo cadad yar ah wuxuuna u sugayaa hal daqiiqo si ay u qalasho.
- Ogsoonoo in SDF ay meesha bolalka ah ka dhigi doonto madoow. Eeg sawirada hoose.
- Cunugaagu wuxuu dareemi karaa dhadhan qaraar sida kan birta, oo baabi'i doona isla markiiba.
- Haddii SDF taabato maqaarka iyo/ama ciridka, midab kumeel gaar ah ayay meesha yeelaneysaa.
- Haddii SDF lagu mariyo ilig leh buuxinta midabka ilkaha oo kale ah, waxaa laga yaabaa in midabku isbadelo.

### Fadlan u sheeg dhakhtarka nadiifinta ilkaha haddii cunugaagu qabo mid uun kamid ah xaaladahaan soo socda:

- Haddii uu xasaasiyad ku qabo biraha qalinka ah ama biraha kale
- Haddii uu leeyahay nabaro afka kasoo baxo oo xanuun badan
- Haddii uu xasaasiyad maqaar oo aan caadi ahayn qabo

### Kadib daaweynta:

- Cunugaagu waa inuusan cadayin ilkahiisa inta maalinta ka hartay.
- Waxyeellooyinka caafimaad daro ee kor lagu xusay waxaa laga yaabaa inaan lagu darin dhammaan waxyeellooyinka laga dhaxli karo ee shirkada soo saartay sheegtay. Haddii aad aragto waxyeello aan kor lagu xusin, fadlan la xariir kalkaalisada dugsigaaga.
- Haddii cunugaagu uusan haysan dhakhtar ilko oo uu badanaa xaadiro, dhakhtarka nadiifinta ilkaha ayaa kaa caawin doona helida goob cunugaagu daryeel joogto ah ka heli karo, daryeelka ilkaha ee balaaran.
- Daaweynta SDF waa in lagu celiyaa lixda billood ee soo socota haddii cunugaagu uusan wali helin daaweynta ilkaha ee caadiga ah.

### Ilkaha lagu daaweyay daawada SDF:



Photo Credit: Dr Jeanette MacLean



Photo Credit: Dr Jeanette MacLean

Aniga oo ah, \_\_\_\_\_, waxaan akhriyay foomkaan waxana fahmay daaweynta. Daaweynta, oo ay kujirto khataraha iyo faaidooyinka, waxaa la iigu sharaxay qaab aan ku qancay waxaana helay fursad aan ku waydiiyo su'aalaha aan qabay. Waxaan fahamsanahay inaysan jirin damaanad qaad ah in daawadan shaqeyn doonto. Waxaan halkaan oggolaansho ku siinayaa dhakhtarka nadiifinta ilkaha si uu hawshan u sameeyo.

Taariikhda: \_\_\_\_\_ Saxiixa Bukaanka:

Saxiixa Waalidka Bukaanka, Masuulka, ama Wakiilka Sharciyeed (haddii uu jiro): \_\_\_\_\_

Saxiixa marqaatiga: \_\_\_\_\_

Oggolaanshahan wuxuu shaqeyn doonaa ilaa inta uu ka laabanaayo waalidka ilmaha ama masuulka sharciga.